



## WAXA CUSUB



TRS waxay la shaqeyneysaa bulshada Soomaaliyed ee qurbaha iyo Soomaalida si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan COVID-19. Abwan Foosiya Axmed, waxay u adeegsaneysaa xirfadaheeda gabayga si ay kor ugu qaaddo wacyiga ku saabsan COVID-19. Foosiya waxay nala wadaagtay qiisaheeda markey wiilkeeda ay Tahrifku weyday waxayna ka qeyb qaadatay mashruuca TRS ee ka dhacay Soomaaliya halkaas oo ay sheekadeeda la wadaagto dhalinyarada. Halkan ka daawo [Sheekada Foosiya](#) iyo [Gabaygeeda](#).

**Booga** TRS ee la cusboonaysiiyay, halkaas oo aad ka daawan karto dhammaan sheekoyinka, oo aad la socon karto hawlaheena mashruuca. Wuxaan si rasmi ah u biloownay barnamijkeena afarta qaybood ee idaacada Radio Hargeisa, kaas oo ay gaaraayaan 50,000 dhagaystayaal.

## HAWLAHA

*Hawlaho hoose waxay dhaceen kahor inta uusan dhicin faafitaanka COVID-19 ee Bariga Geeska Afrika iyo Yurub.*

### Waxqabadka Mashruuca Soomaaliya iyo Itoobiya



TRS waxay qabatay casharro ka badan **6,000 oo arday** iyo dhalinyaro ah oo ku nool Soomaaliya. Kulamada waxaa ka mid ahaa doodaha ardayda caadiga ah iyo doodaha lagu qabto iskuulada iyo jaamacadaha. Ardayda looma jeedo kaliya halista tahrif, waxay sidoo kale fursad u leeyihiin inay la wadaagaan aragtidooda ku aaddan arrinta. TRS waxay muujineysaa marag-kacyo iyo dhalinta laga soo celiyay Liibya sidoo kale waxay la wadaagaan waaya-aragnimadooda.



**Kalfadhiyada latalinta xirfadaha** sidoo kale waxaa lagu soo daray nashaadaadyada ardayda ee TRS. Kulamadan aaya waxaa bixiya lataliyeyaal mihnadlayaal xirfadeed kuwaas oo bixiyay maclumaad ku saabsan suuqa shaqada ee deegaanka oo kaala taliya farsamooyinka shaqo raadinta, dib u bilaaba oo daboolaya qoritaanka warqad, iyo farsamooyinka wareysiga shaqada.

Itoobiya, waxaan ka sii wadnaa qabashada **tartan qaxootiga** oo muujinaya gabay qiro leh, heeso, qoob ka ciyaar, iyo masrax ka socda qaxootiga aaya la soo bandhigay. Ku guuleystayaasha waxaa lasiyyat taageero maaliyadeed si ay uga sii faa'ideystaan una kobciyaan habloodooda. Wuxaan fursad u helnay inaan helno fannaaniin caan ah oo Soomaali ah oo ka qeybqaata bandhigyada hiboooyinka sida Mursal Muuse, Yurub Geenyo, iyo Xarir Ahmed

### Kulunka Qurbojoogta ee Europe



Wuxaan fursad u helnay inaan la kulanno qurbo-joogta Soomaaliyed ee ku nool Sweden, United Kingdom iyo Malta. Kulunkan aaya isu keenay hoggaamiyeeyashaa qurbaha, u dhaqdhaqaayaasha iyo ururada ay qurba-joogtu hoggaanka u hayaan oo ku saabsan. Ujeedada kulunka aaya ahaa in la wadaago waxa cusub ee TRS ee loogu talagalay baahinta qurba-joogta iyo in la helo isbeddello cusub iyo maclumaad la xiriira dhaqdhaqaqa qurbo-joogta, iyo kuwo kale. Ka raadi [faahfaahin dheeraad](#) ah bogga cusub ee TRS.

## WAXA SOO SOCDA

- Bandhigga show ee Masar, Qahirah:** TRS waxay wadahadal la yeelatay xubno ka tirsan bulshada Soomaalida ee ku nool Masar. Bandhigyada waxa la so dhigii doona booga internetka iyo aaladaha warbaahinta bulshada, bilaha soo socda.
- Shirka qurba-joogta internetka:** Intii lagu gudajiray waqtigaan dilaaca COVID-19, waxaan ku qaadan karnaa kulammada qurba-joogga khadka. Faahfaahinta soosocda ka war suug shiirkan.